

Waxa SYSVAK laga diiwaangelin karaa tallaallada koroona ee dibedda laga soo qaatay

Waxa hadda la oggolaaday in tallaallada koroona ee dibedda laga soo qaatay laga diiwaangeliyo SYSVAK. Waxa shardi ah in tallaalku yahay mid ay oggolaatay hay'adda dawooyinka ee Yurub, iyo in qofka la tallaallay leeyahay lambarka dhalashada ama d-lambar noorwiiiji ah.

– Dad badan oo tallaalka koroona ku soo qaatay dibedda, ayaa hadda diiwaangelin kara tallaalkoodaa, oo markaa heli kara shahaado koroone oo cagaar ah oo markaana laga dhaafi karaa ama soo gaabin kara karantiilka soo gelidda waddanka, ayuu yidhi Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Haddii qofku si buuxda ku tallaallan yahay tallaalka ay oggolaatay hay'adda dawooyinka ee Yurub (EMA) waxa laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda waddanka. Wakhti ayay qaadatay in SYSVAK loo sameeyo meel la gelin karo tallaallada lagu qaatay dibeddaha, iyo in la diyaariyo tilmaamaha habka loo samaynayay diiwaangelintooda.

Hadda waa la diyaariyey halkii laga gelin lahaa tallaalkaas, oo markaana waxa la calaamadin doonaa tallaallada laga soo qaatay dibeddaha si looga sooci karo tallaallada lagu qaatay Norway, arrintaasoo muhiim u ah la socoshada barnaamijka tallaallada ee Norway. Waxa kale oo iyana muhiim ah in Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) hayo tirada saxda ah ee dadka deggan Norway ee la tallaallay iyo tirada tallaalka Norway lagu isticmaalay.

Balan caafimaad oo internetka ah ka hor intaan la iman Norway

Diiwaangelinta waxa la samayn karaa ka hor intaan la iman Norway. Waa inaad ballan ka samaysatid dhakhtarka joogtada ah, adeegyada caafimaadka ee degmada ama goobaha caafimaadka ee gaarka loo leeyahay ee ku yaalla Norway, si aad u caddayso tallaalka aad dibedda ku soo qaadatay.

Waxa wacan in ballantu ahaato mid internetka ah oo la isticmaalayo cod/qoraal/muuqaal, si dhakhtarku u arko caddaymaha tallaalka ee qofku haysto, islamarkaana u go'aan uga qaato in caddaynta la aqbali karo iyo in kale.

Waa in dhammaan tallaallada la qaatay lagu qoro joornaal u gaar ah, iyadoo islamarkaana laga diiwaangelinayo SYSVAK.

– Waa muhiim in shaqaalaha caafimaadka ee gadaal ka diiwaangelinaya tallaalka la siiyo tilmaamo wacan, si ay u habsan karaan in macluumaadku sax yahay. Tilmaansiintaasi waxa ay hadda ku jirtaa bogga FHI, ayuu yidhi Høie.

Waa in qofku iska bixiyo lacagta ballanta diiwaangelinta tallaalka. Haddii ballanta laga samaysto dhakhtarka joogtada ah waa in qofku iska bixiyo lacagta qaybta qofka laga rabo oo dhan, waayo kharashkaasi ma ku jiro miisaaniyadda.

Tallaallada EMA oggolaatay oo keliya

FHI wuxu soo jeediyay in tallaallada EMA oggolaatay oo keliya laga diiwaangelin karo SYSVAK. Arrintani waa ay ka madaxbannaan tahay waddanka lagu soo qaatay tallaalka. Tallaallada ay oggolaatay EMA waxa la ogyahay tayadooda, dhibta ka iman karta iyo waxtarkooda ba, islamarkaana dhammaan tallaallada lagu isticmaalo Norway waa inay ahaadaan kuwo haysta oggolaanshaha EMA. Waxa mar dambe la eegi doonaa in la oggolaado in tallaallada aan haysan oggolaanshaha EMA laga diiwaangelin karo SYSVAK.

Tallaalladaasi xilligan ma keenayaan in qofku xaq u yeesho in laga dhaafo ama loo soo gaabiyo karantiilka soo gelidda waddanka, ama inuu helo shahaado koroone oo cagaar ah.

FHI ayaa soo saartay tilmaamaha diiwaangelinta tallaalka dibeddaha. [Faahfaahin ka akhriso FHI.no](#).